



## Mulkiilaha Guriyayga ayaa Hadda i siiyay Ogaysiis 10 Maalmood ah oo sheegaaya Inaan raaco xeerka ama Ka guuro

- 
- ❖ Akhri macluumaadkaan kaliya haddii aad ku nooshahay gobolka Washington.
  - ❖ Sharciga guri ka saarida ayaa wali isbadalaaya. Ka akhri isbadalladii ugu danbeeyay ee ku dhaca sharciga barta [WashingtonLawHelp.org/resource/eviction](https://www.washingtonlawhelp.org/resource/eviction)
  - ❖ Haddii mulkiilaha gurigaaga kuugu hanjabo inuu guriga kaa saaraayo, wac **1-855-657-8387** AMA caawimaad oonleen uga codso barta [nwjustice.org/apply-online](https://nwjustice.org/apply-online).
  - ❖ Waxaad halkaan ka heli kartaa dhammaan waraaqaha xaqiiqda ah ee aan ku xiran arrintan WashingtonLawHelp.org.
- 

### Waxaan ku noolahay gobolka Washington, ma aqriyaa qoraalkan?

**Haa**, haddii aad kiraysatay meesha aad ku nooshahay aadna hadda heshay Ogaysiiska 10 maalmood ah ee Raac Xeerka ama Ka guur Guriga oo ka yimid mulkiilaha gurigaaga.

**Maya**, Haddii aad leedahay mulkiyada guriga gaariga ah ee aad dagan tahay, aadna kiraysatay meesha gaari gurigu kuu yaalo. Taas badalkeed, akhri [Mulkiilaha beerta gurigayga warshadu samaysay/guur-guura yaalo ayaa hadda i siiyay Ogaysiiska 20 Maalmood ee bixi Kirada ama Ka guur Guriga](#) kadibna la hadal qareen isla markaba. Macluumaadka xiriirka wuxuu ku qoran yahay hoos.

### Maxaan baran doontaa markaan akhriyo macluumaadkaan?

- Waa maxay ogaysiisnaan
- Waxa aad samaynayso haddii ogaysiisnaan kaaga yimaado mulkiilaha gurigaaga
- Meesha laga heli karo caawimaad sharci



## Waa maxay ogeysiiska 10-maalmood ah ee bixi Kirada ama Ka guur Gurigga?

Waa digniin katimid mulkiilaha dhulkaaga. Mulkiile guri oo aaminsan inaad jabisay (ku xadgudubtay) xeer wayn (miiaan culus) oo ku qoran heshiiskaaga kirada, oon ahayn bixinta lacagta kirada, ayaa ku siin kara ogaysiiska noocaan ah.

Ogaysiisku waa inuu kuu sheegaa qodobta tooska ah ee muhiimka ah ("xeerka") oo kmid ah heshiiska kirada kaasoo mulkiilaha gurigaagu aaminsan yahay inaad jabisay. Markaas kadib waxaad haysataa 10 maalmood laga bilaabo taariikhda ad heshay ogaysiiska inaad joojiso jabinta xeerka.

**Tusaale:** Heshiiskaaga kirada ayaa sheegaaya in dadka aan ku qornayn heshiiska kirada aysan guriga kula joogi karin wax ka badan hal asbuuc. Mulkiilaha gurigaaga ayaa ku siin kara Ogaysiiska 10 Maalmood, kaasoo sheegaaya inay kuu joogaan "dadka guriga sharci daro ku dagan." Markaas kadib waxaad haysataa 10 maalmood inaad guriga uga rarto martidaada sharci darada ku dagan, ama mulkiilaha gurigaaga ayaa dacwad guri ka saarid kaa dhan ah u gudbinaaya maxkamada.

Mulkiilaha gurigu waa inuu ku guulaystaa dacwada guri ka saarida ee kaa dhanka ah uuna helaa saxiixa garsooraha ee amarka u sheegaaya booliiska deegaanka inay guriga xoog kaaga saaraan.

Haddii aad xaliso cilada 10 maalmood gudahood markaad hesho ogaysiiska kadib, mulkiilaha gurigaaga waa inuu joojiyaa hawsha guri ka saarida.

## Ka waran haddii aan ku noolahay Guryaha Waaxda Guriyaynta ama Qaybta 8?

Mulkiilaha ayaa sidoo kale ku siin kara 10 maalmood oo Ogaysiis ah haddii aad si wayn u jabiso sharuudaha guryaha (kaabsta lagu baxsho) ee barnaamijka guryaha dawlada. Haddii arintaani kugu dhacdo, waxaad leedahay xaquuqo badan oo aanaan halkaan ku sheegayn. Akhri [Guri Ka saarida HUD](#) iyo/ama [Guri Ka saarida Guryaha Dawlada \(Guryaha ay Leedahay Waaxda Maamulka Guryaha\)](#) si aad u hesho xog dheeraad ah.

## Ka waran haddii aanan waafaqi inaan jabiyay xeer?

U qor mulkiilaha guriga waraaq aad ku sheegayso inaad ku raacsanayn (ku khilaafsan tahay) Ogaysiiska 10 Maalmood. Hayso koobiga waraaqdaada. Iskuday inaad hesho caawimaad sharci. Macluumaadka xiriirka wuxuu ku qoran yahay hoos.

## Miyay tahay in Ogaysiiska 10 Maalmood ah loo bixiyo si gaar ah?

Milkiilaha guriga (ama shaqaalahooda ama qof kale oo qaangaar ah) ayaa "shaqsiyan" guriga kuugu keeni kara ogaysiiska. Mulkiilaha guriga ayaa sidoo kale u dhiibi kara ogaysiiska qof kale oo wayn ama kuray guriga kugula nool. Mulkiilaha ayaa sidoo kale ku dhajin kara ogaysiiska albaabkaaga, laakiin waa qasab inuu sidoo kale nuqul kuugusoo diro boostada.

Ogaysiiska 10 Maalmood oo lagusoo diraayo fariin qoraal, fariin codeed, iimeel ama si toos ah loo keenaayo maaha ogaysiis quman. Ma bilaabaayo hawsha guri ka saarida.

---

❖ Ogaysiiska qasab ma aha in la nootaayo.

---

## Mulkiilaha gurigaygu ma iiga saari karaa inuu ogaysiiska keliya i siiyay?

**Maya.** Sharciga Washington uma fasaxaayo mulkiilayaasha guriyaha inay qofka ka saaraan guriga ayagoon raacin hanaanka saxda ah ee guri ka saarida. Mulkiilaha gurigu waa inuu ku siiyaa ogaysiiska saxda ah ee qoran ee "**guri ka saarida**" kahor intaan mulkiilaha gurigu uusan furin dacwada guri ka saarida. Ogaysiiska 10 Maalmood ah ee Ku dhaqan xeerka ama Ka guur Guriga waa hal nooc oo kamid ah ogaysiiska guri ka saarida.

Mulkiilaha gurigu waa inuu ku siiyaa waraaqaha rasmiga ah ee maxkamada oo loogu yeero "Dacwad ugu yeerid" iyo "Cabashada". Waraaqahaan ayaa kaa dooni kara inaad jawaab u dirto mulkiilahaaga ama qareenkiisa. Mulkiilaha guriga ayaa u baahan in uu kuu keeno dukumiintigaan haddii mulkiilaha gurigaagu doonaayo in kiiska loo gudbiyo maxkamada.

Haddii aadan helin dukumiintiyada maxkamada, wac **Laynka Baaritaanka Difaaca ka dhanka ah Guri Ka saarida ood ka helayso 1-855-657-8387.**

**Mulkiilaha gurigayga ayaa hadda i siiyay mid kamid ah ogaysiisyadaan. Waan awooday inaan arimaha xal kala gaaro mulkiilaha guriga kahor intaan mulkiiluhu dacwada guri ka saarida soo gudbin. Maxaa dhacaaya haddii aan helo ogaysis kale?**

Haddii aad hesho d hesho far ogaysiis oo Sax ah, oo 10 Maalmood ah kuuna sheegaaya inaad Ku dhaqan xeerka ama Ka guurto guriga sanad gudihiis, mulkiilaha guriga ayaa soo afjari kara kiradaada asagoo ku siinaaya **Ogaysiiska 60 Maalmood ee Ka guurista Guriga** kahor dhammaadka mudada loo cayimay heshiiska. Ogaysiisyada waa inay dhammaan la xariiraan dhacdooyin kaladuwan.



## Hel Caawinaad Sharci

- **Soo Wajahida Ka-Saarida Guriga?** Wac 1-855-657-8387.
- **Codso onlayn** [CLEAR\\*Online](https://www.nwjustice.org/apply-online) - [nwjustice.org/apply-online](https://www.nwjustice.org/apply-online)
- **Maku haysataa dhibaatooyin la xiriira deyn ka qaadashada dadka aad deynta ku leedahay?** Wac 1-800-606-4819.
- **Isagoo wajahaya arrin sharci ee Degmada King** (marka laga reebo Guri Ka-saarid ama La-wareegis)? Wac 2-1-1 (ama khadka bilaashka ah 1-877-211-9274) maalmaha shaqada 8:00 am - 6:00 pm. Waxay kuu gudbin doonaan bixiyaha kaalmada sharciga.
- **Isagoo wajahaya arrin sharci oo ka baxsan Degmada King** (oo aan ahayn Guri Ka-saarid ama La-wareegis)? Ka wac Khadka CLEAR 1-888-201-1014 maalmaha shaqada ee u dhexeeya 9:15 am - 12:15 pm ama ka codso onlaynt [nwjustice.org/apply-online](https://www.nwjustice.org/apply-online).
- **Waayeelka (da'da 60 iyo ka weyn)** oo leh arrin sharci oo ka baxsan Degmada King ayaa sidoo kale wici karta CLEAR\*Sr ee 1-888-387-7111.
- **Dhagoolaha, dadka maqalka adag ama hadalka daciifka** ah ayaa wici kara mid kasta oo ka mid ah lambarradan iyagoo adeegsanaya adeegga gudbinta ee ay doortaan.

CLEAR iyo 2-1-1 ayaa bixin doona turjumaadyo.

---

Daabacaadaan waxay bixinaysaa macluumaad guud oo laxariira xaquuqaahaaga iyo waajibadka kusaaran. Looguma talogalin in lagu beddelo talo sharci oo gaar ah.

© 2021 Northwest Justice Project — 1-888-201-1014.

(Fasax ayaa loosiiyay inay koobi kala baxaan ayna qaybiyaan Alliance for Equal Justice (Ururka isbahaysiga Sinaanta Cadaalada) iyo shaqsiyaad sababo kabaxsan ganacsi oo kaliya.)